# Sidee Lambarka Bulshada Kuu Caawin Karaa Marka Qof Qoyska Ka Tirsan Geeriyoodo

Miiska ku jira

La Xiriirka Lambarka Bulshada 2

Waa in aad soo wargelisaa Lambarka Bulshada sida ugu dhaqsaha badan marka qofka qoyska ka tirsan geeriyoodo. Xaaladaha intooda badan, madaxa goobaha meydka la geeyo ayaa soo wargeliya geerida Lambarka Bulshada. Waxaa lagaa doonayaa Lambarka Bulshada ee qofka geeriyooday in aad soo siiso maamulaha qabuuraha si ay u soo sheegaan:

Qaar ka mid ah qoyska qofka geeriyooday waxaa suurogal ah in ay macaash ka helaan Lambarka Bulshada haddii qofka geeriyooday uu shaqeynayey muddo ku filan uuna xaq u leeyahay macaashka. **La xiriir Lambarka Bulshada sida ugu dhaqsaha badan si aad u xaqiijiso in qoysku helo dhamaan waxyaabah ay xaqa u leeyihiin**. Fadlan si taxadar leh u kahrio macluumaadka hoos ku xusan si aad wax uga ogaato macaashka aad heli karto.

- Waxaan bixinaa lacah hal mar la bixiyo oo dhan $255 oo la siiyo xaaska/sayga haddii uu la noolaa qofka geeriyooday. Hadii ay kala nool yihiin oo diiwaanka ay ku caddahay in ay macaash ku qaadanayeen qofka geeiyooday, xaaska/sayga laga geeiryooday waxaa suurogal in ay weli xaq u yeelanayaan in lacagtaas halka mar ah la siiyo. Haddii aanu jirin xaas/say, lacagta waxaa la siiyaa ilmaha xaqa u leh ee macaashka ee ku qornaa diiwaanka qofka geeriyooday bisha uu geeriyooday.
- Qaar ka tirsan xubnaha qoyska **ayaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan** in la siiyo macaash bil kasta ah, oo ay ka mid yihiin:
  - —Garoob rag iyo dumar oo 60 ama ka weyn (50 ama ka aweyn haddii uu naafo yahay)

- — Xaaska/sayga dhaxlaya da' kasta oo uu jiro oo korinaya caruur ka yar 16 sano ama naafo ah.
- — Ilmi aan xaas aheyn oo qofka geeriyooday dhalay oo:
  - Ka yar 18 (ama ilaa 19 haddii uu yahay arday xilliga buuxa dugsi dhexe ama sare dhigta); ama
  - daDdiisu tahay 18 ama ka weyn oo naafo noqday intuusan gaarin da'da 22.
- — Ilmo xaaskiisa/seygiisa dhalay, awoowe u ah, awoowe ugu ah in xaaska ilmihiisu dhaleen, ama xaalado gaar ah ku korsaday ilmaha.
- — Waalidiinta, da'doodu tahay 62 ama ka weyn, oo la noolaa qofka geeriyooday oo ugu yaraan uu taageeri jiray kala bar; iyo
- — Xaas/say ay kala tageen, xaladaha gaar ah.

**Haddii qofka geeriyooday uu qaadanayey macaashka Lambarka Bulshada**, waa in la soo celiyaa bisha uu geeriyooday iyo bilaha ka dambeeya. Tusaale ahaan, Haddii qofku geeriyoodo Luulyo, waa in la soo celiyaa macaashka la siiyey Agoosto. Haddii lacagta si toos ah loogu shubi jiray bangiga, la xiriir bangiga ama hay'adaha kale ee maaliyadda si ay su soo celiyaan wixii lacaga ah oo lagu shubay xisaabta bisha uu qofku geeriyooday iyo ka dib. Haddii macaashka jeeg ahaan la idinkugu soo diray, **ha sarifin** jeegga geeridu dhacay iyo bilaha ka dambeeya. Jeeggaga dib ugu soo celi Lambarka Bulshada sida ugu dhaqsaha badan.

Hase yeeshee, qoysaska qaarkod waxaa laga yaabaa in ay xaq u yeesheen macaashka geerida bisha uu qofku geeriyooday.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta



*(rogad)*

ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



**Social Security Administration**
Publication No. 05-10008-SO | May 2017
Sidee Lambarka Bulshada Kuu Caawin Karaa Marka Qof Qoyska Ka Tirsan Geeriyoodo
How Social Security Can Help You When a Family Member Dies (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha